



JÄRFÄLLA

Soo sheegashada iskuulka aad dooneysid oo fasalka ardeyda lix sano jirka iyo fasalka 6.

Soo dooro iskuulka aad dooneysid ugu dambeyn 15 jannaayo oo soo gal bogga internetka www.jarfalla.se/skolplats

Adiga oo haysto canug oo bilaabi fasalka ardeyda lix sano jirka ama fasalka 6 dayrta 2018 waa inaa soo sheegataa iskuulka aad dooneysid wakhtiga inta u dhaxeeyso 8 diisambar ilaa 15 jannaayo.

Soo dalbo iskuulada degmada

Adiga baa gacantaada ku soo dalban iskuulka aad dooneysid inuu canugaaga dhigto. Adiga dalabkaas waxaad ka soo suubin adeega digitaalka oo waxaad soo gali bogga internetka oo degmada, www.jarfalla.se/skolplats.

Sidaa adeegaas u isticmaal kartid adiga waxaad u baahantahay aqoonsiga digitaalka [bank.id] oo bangiyada bixiyaan. Warbixin ku saabsan sida loo dalbado aqoonsiga digitaalka waxaad ka heli bangigaada ama meeshaan <https://support.bankid.com/sv>.

Siduu adeega digitaalka kugu noqdo mid aad isticmaal kartid adiga waxaad u baahantahay in kombiyuutarkaada kugu jiro barnaamishka internetka lagu soo galo kuwii ugu dambeeyay sida camal: Chrome, Firefox, Internet Explorer ama Edge.

Soo dalbo iskuul qaas ama iskuul degmo

Haddii aad dooneysid inaa boos ka dalbatid iskuul qaas ama iskuul degmo kale ku yaal adiga shaqsiyan waa inaa iskuulkaas la xiriirtaa. Iskuulada qaaska midkasto wuxuu lee yahay saf gooni.

Martigaad boos iskuul

Iskuulada degmada waxeey soo diri martigaadida boos iskuul dhammaadka bisha feebarwari. Siduu canugaaga u helo iskuulka oo lagu soo martigaaday waa in dhammaan waalidka mas'uulka ah soo wada ansaxiyaan martigaadka.

Iskuulada qaaska waxeey soo gudbin martigaadida boos iskuul wakhti kale.

Haddii adiga aadan soo sheegan iskuulka aad dooneysid

Degmada Järfälla waxaa mas'uul ka saaran yahay in dhammaan carruurta ka diwaangalisan degmada oo da' iskuul gaaray ey helan boos iskuul. Ardeyda oo bilaabi doono fasalka ardeyda lix sano jirka waxeey xaq u lee yahiin in boos iskuul ka helan iskuul ku yaal qeybta degmada uu diwaangalisan iney ku nool yahiin. Taa-na waxeey micnaheeda tahay haddii adiga aadan soo sheegan iskuulka aad dooney-

sid ardeyga waxaa boos laga siin iskuul ka ag dhow gurigiisa oo qeybta degmada uu ku nool yahay oo markaas boos ka bannaan yahay.

Ardeyda dhigto fasalka 6 oo soo sheegan iskuulka ey doonaayaan, waxaa boos laga siin iskuulka gurigooda ka ag dhow oo markaas boos ka bannaan yahay. Ardeydaan loo ma fiirinaayo qeybta ey degmada ka degenyahiin oo degmada guud ahaan baa loo fiirin oo qeybta degmada aad ku nooshahay wax macno kuma fadhiso.

Ardeyda dhigto fasalka 5 oo iskuul leh fasalada F ilaa 9 waxeey xaq u lee yahiin iney isla iskuulkooda sii dhigtaan fasalka 6. Haddii adiga aadan soo sheegan iskuulka aad dooneysid ardeyga sidaas daraadeed waxaa boos laga siin isla iskuulka.

Sidaan baa boosaska iskuulada loo kala qeybin

Ilaa intii suurtagal ah degmada Järfälla weey ku dadaali in adiga heshid iskuulka aad soo sheegatay. Haddii eysan suurtagalin ardeyga inuu helo iskuulkii uu gacanta koo-wad soo doortay, degmada waxeey ku dadaali iney boos ka siiso iskuulkii uu ardeyga gacan labaad ahaan soo doortay oo sidaa bey ku socon.

Fasalada ardeyda lix sano jirka – iskuulada degmada

1. Ardeyga oo la siiyo walaal mudnaan
2. Ardeyga soo sheegtay iskuulka uu dooni, oo qeyb kamid ah degmada ku nool
3. Ardeyga aan soo sheegan iskuulka uu dooni, oo qeyb kamid ah degmada ku nool
4. Ardey degmada qeybkale uga nool
5. Ardey degmo kale ku nool

Walaal mudnaanta waxeey ku quseeyn haddii uu jiro walaal oo dhigan fasalka 1 ilaa 5 oo isla iskuulkaas. Mudnaanta waxeey suurtagal tahay helitaanka booska koowad oo iskuulka iyo lama adeegsankaro haddii iskuul badalaneysid.

Fasalka 6 – iskuulada degmada mas’uulka ka tahay

Nidaamka boos bixinta fasalka 6 waa sidan:

1. Ardeyga soo sheegtay iskuulka uu dooni
2. Ardeyga aan soo sheegan iskuulka uu dooni
3. Ardey degmo kale ku nool

Haddii boosaska ey buuxsamaan

Maamuleyaasha iskuulada baa go’ aamin inta ardey uu iskuulkooda qaado. Haddii tirada ardeyda soo dalbatay ey ka badantahay iskuulkaas inta uu qaado waxaa boosaska lagu kala bixin nidaamka boos bixinta sida korkaan ku qoran ilaa inta ey suurtagal tahay. Markaas kadib waxaa lagu dhaqmi nidaamka agagaarka isla bar-bardhigida.

Boos oo dugsiga xilliga firaaqada/goobta xilliga firaaqada

Dhammaan carruurta oo bilaabo fasalka ardeyda lix sano jirka waxaa boos laga siiyaa dugsiga xilliga firaaqada oo isla iskuulka ey dhigan doonaan.

Haddii canugaaga uu dhigto dugsiga xannaanada ama daryeelida waxbarida oo Järfälla si toos baa canug boos looga siin dugsiga xilliga firaaqada. Haddii canuga uusan baahi dhigashada dugsiga xilliga firaaqada waa qasab in waalidka mas'uulka ah la soo xiriiran degmada Järfälla oo booskaas fasaxaan.

Haddii canugaaga uusan horey usoo dhigan dugsiga xannaanada ama daryeelida waxbarida oo Järfälla adiga waa inaa soo codsataa dugsiga xilliga firaaqada. Adiga waxaad codsigaada ka soo dirsan bogga internetka oo www.jarfalla.se.

Haddii aad dooneysid in canugaaga oo bilaabi fasalka 6 inuu ka soo qeybgalo goobta xilliga firaaqada adiga arrintaas waxaad ka soo codsan bogga internetka oo www.jarfalla.se. Waa inaa lixdii biloodba halmar soo codsataa.

Nidaamka agagaar isla barbardhigida

Nidaamka agagaar isla barbardhigida micnaheedo wuxuu yahay in la fiirin ardeyga gurigiisa iyo iskuulka uu soo dalbatay inta ey isku jiran iyo iskuulada kale oo meesha ka dhow oo markaasna lala barbardhigi ardeyda kale intuu u jiro. Waxa aan dooneyno baa ah in dhammaan ardeyda wada helaan iskuul in macquul ah u jiro. Arrintaan micnaheeda baa ah in ardeyga uusan haysan ballanqaad inuu boos ka heli iskuulka ugu dhow.

Cabbiraada ma ahan wadada tooska oo waxaa la fiirin lugeysi ama baskiil ahaan inta ey ardeyga ku qaadan laga soo bilaabo guriga ardeyga u diwaangalisan, 1 feebarwari 2018, inuu ku noolyahay ilaa iskuulka.

Warbixin kale oo nidaamka agagaar isla barbardhigida waxaad kan heli www.jarfalla.se/skolplats.

Kulan warbixin iyo iskuul soo booqashada oo iskuulada Järfälla

Ku soo dhawoow dayrtaan kulan warbixin oo ku saabsan iskuulada Järfälla sidaa ugu sii diyaar garoobi kartid soo codsashada fasalka ardeyda lix sano jirka iyo iskuul soo booqashada oo isku diyaarinta soo codsashada fasalka 6. Soo sheegashada iskuulka aad dooneysid oo soo gal jarfalla.se/skolplats **ugu dambeyn 15 jannaayo**.

Kulan warbixin oo quseeyo waalidka

- isku diyaarinta fasalka ardeyda lix sano jirka

Barkarby iyo Skälby	Taariikhda	Wakhtiga
Barkarbyskolan	30/11	18.30
Herrestaskolan	5/12	18.30
Neptuniskolan	14/11	18.30
Skälbyskolan	23/11	18.00
Jakobsberg		
Aspnässkolan	30/11	18.00
Berghemskolan	20/11	18.00
Nybergskolan	29/11	18.30

Olovslundskolan	15/11	18.30
Tallbohovskolan	29/11	18.30
Vattmyraskolan	20/11	18.00

Iskuulada qaaska

Montessoriskolan Växthuset	6/12	18.30
Vittra Jakobsberg, 08-584 105 90	30/11	18.00

Kallhäll iyo Stäket

Iljansbodaskolan	23/11	18.00
Kolarängskolan	27/11	18.00
Ulvsättraskolan	28/11	18.30

Viksjö

Fastebolskolan	28/11	18.00
Högbyskolan (<i>i Fastebolskolan</i>)	28/11	18.00
Fjällen dugsi xannaano iyo iskuul	7/12	18.00
Lundskolan	23/11	18.00
Sandvikskolan	21/11	18.00

Booqashada iskuulada – isku diyaarinta fasalka 6

Björkebyaskolan	5/12	18.30
Fjällen dugsi xannaano iyo iskuul	7/12	18.00
Järfälla fasal muusig[musikklass] (<i>i Tallbohovskolan</i>)	29/11	18.30
Källtorpskolan	28/11	18.30
Kvarnskolan	6/12	18.30
Tallbohovskolan	29/11	18.30
Viksjöskolan	30/11	18.30

Iskuulada qaaska

Internationella Engelska Skolan 08-584 306 30 info.jarfalla@engelska.se		
Vittra Jakobsberg, 08-584 105 90	30/11	18.00

Fadlan nala soo xiriir!

Warbixin ku saabsan soo codsashada iyo dugsiyada xannaanada iyo iskuulada Järfälla waxaad ka heli jarfalla.se/skolplats.

Su'aalo weeydiin, la soo xiriir xafiiska adeegida guud oo degmada Järfälla oo telefoon lambarka waa 08-580 285 00.